

## **NIDAAMKA SOO CELINTA LACAGTA FASALKA 12AAD EE 2020**

Habka loo soo celiyo lacag celinta (\$ 70-ka doolar) lacagta (khidmada) fasalka 12aad waxay ku xiranaan doontaa habka lacag bixinta.

1. Ku bixinta khadka tooska ee Internetka ama shaqsi ahaan ee kaarka bangiga ee (credit card) ama lacag Jeeg ah waana lacagta si elektaroonig ah ayaa looga wareejiyaa koontada hubinta bixiyeyaasha (eCheck).
2. Bixinta qofka oo wata lacag caddaan ah, jeeg ama lacagta ah jeega boostada (money order).
3. Bixinta lacagta ayadoo loo marayo hay'ad xiriirisa ama magaca hay'ad oo wakiil ka ah magaca ardayga.

### **Ku bixinta kaarka lacagta bangiga ee loo yaqaan (credit card) ama lacag Jeeg ah waana lacagta si elektaroonig ah ayaa looga wareejiyaa koontada hubinta bixiyeyaasha (eCheck)**

- Lacag celinta waxaa lagu bixin karaa oo kaliya kaarka lacagta ee asalka ah ee bangiga (credit card) ama koontada loo isticmaalo lacag bixinta.
  - **XUSUUS:** Haddii kaarka lacagta ee bangiga (credit card) ama macluumaadka bangiga ee loo adeegsado lacag bixinta uu isbedelay, fadlan kula xiriir emayl ahaan cinwaanka Haley Oldaker ee [holdaker@columbus.k12.oh.us](mailto:holdaker@columbus.k12.oh.us).
  - Haddii kaarkaaga lacagta ee bangiga (credit card) ama macluumaadka bangiga uusan isbedelin, uma baahnid inaad cidna la soo xiriirto. Lacag soo celinta ayaa si otomaatig ah laguugu soo shubayaa koontadaada.
- Waxay kuxirantahay waqtiga howsha ay qabato hay'addaada lacageed, waxay qaadan kartaa 2- ilaa 3 asbuuc kahor inta lacag celintu kasoo muuqaneyso waraaqaha warbixinta bangigaaga.

### **Ku bixinta lacag caddaan ah, lacag jeeg ah ama lacag ah jeega boostada (money order)**

- Jeeg soo celinta ayaa lasameyn doonaa iyadoo lagu saleynayo macluumaadka lagu bixiyay Xarunta (Infinite Campus.)
- Waxa loo baahan yahay: magaca qofka bixiyay, cinwaanka dib u soo celinta lacagta iyo inta (qadarka) la soo celin doono.
  - Fadlan hubi in dhammaan macluumaadka lala xiriirayo shaqsiyaadka ku jira Xarunta (Infinite Campus) ay sax yihiin. CCS waxay la xiriiri doontaa waalidiinta /wakiilada/ ardayda haddii macluumaad laga waayo Xarunta (Infinite Campus-ka).
  - **XUSUUS:** Haddii cinwaanka boostada la bedelo, fadlan kula xiriir emayl ahaan Haley Oldaker ee [holdaker@columbus.k12.oh.us](mailto:holdaker@columbus.k12.oh.us) **IYO** cusboonaysiinta macluumaadka gudaha Xarunta (Infinite Campus).
- Jeegag soo celinta waxaa sameyn doona waaxda lacag bixinta mar alla markii la helo dukumiintiyada oo dhan.
- Marka hawsha la dhammeeyo, waxay qaadan kartaa 2-ilaa 3 toddobaad kahor inta aan la soo celin lacag-bixinta.

### **Lacag bixinta laga sameeyay hay'adda dibbedda ah (tusaale, isku xirka masruuca, Degmada Franklin, iwmm)**

- Haddii lacagta lagu bixiyay magaca ardayga oo ay bixisay hay'ad dibadda ah, lacag celinta waxaa la siin doonaa hay'adda ku habboon.
  - Lacagaha **LOOMA** soo celin doono waalidka / wakiilka / ardayga.